



# Labo Munaasabood oo Lagu Soo Bandhigi Doono Qeybo Ka Mid ah Farshaxanka Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS)

Juun 3, 2021

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ee PPS,

Iyada oo aan dhammeystireyno sanad-dugsiyeed ay ku gadaamnaayeen arrimo fara badani oo aan hore inoo soo marin, waxa aan tallo ku soo jeedin lahayn inaad ka qeybqaadataan labada munaasabood ee ay soo qaban qaabiyeen Waaxda Farshaxanka Maqalka iyo Muuqaalka PPS oo ay soo bandhigayaan qeybo ka mid ah farshaxanka, waxqabadka iyo hal abuurnimada ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland.

**HeART of Portland:** Noocan farshaxanka ahi waa mid xadidan kuwaasi oo aan sanadkiiba hal mar soo bandhigno iyaga oo loo daawan karo qof ahaan, sidoo kale cidii rabtaa ay ka daawan kartaan online. In ka badan 200 oo arday kana mid ah Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa laga soo ururiyey qeybahani farshaxanada ah iyaga oo u hibeynaya fikrada odhanaysa “Kaadhadhka Dunida,” waxaana dhiirigaliyey shaqada uu qabtay Ansel Adams, isaga oo ah sawirqaade ku soo baxay kaalinta kama dambeysta ah sawirqaadayaashii laga tartansiiyey Maraykan. Qeybahan farshaxanka ah waxa lagu soo bandhigayaa si loo daawado laga bilaabo bisha Juun 1deeda ilaa Juun 30keeda Madxafka Farshaxanka Portland ee laga iibsado hadyadaha (gift shop) ee hadda lagu soo bandhigo farshaxanka Ansel Adams.

Qeybahan farshaxanka ee PPS waxaa lagu daawan karaa bilaash iyada oo aad ka fiirsan kartaa daaqada dukaanka laga iibsado hadyadaha (wuxuu ku yaalaa barxada abannaanka ee madxafka), sidoo kale martidu si dhow ayey u daawan kartaan iyada oo haddii aad rabto inaad gudaha gasho u baahan doontaan tigidh aan ku gashaan bandhiga Adams. Dhammaan ardayda da’doodu tahay 18 iyo wixii ka yar waxay si bilaa lacag ah ku gali karaan madxafka, laakiin waxa ay u baahan yihiin inay hore ka sii qabsadaan tigidhadii ay ku gali lahaayeen madxafka. Fadlan waxaad fiirisaan [Shabakada Madxafka Farshaxanka Portland](#) si aad uga gadataan/u sii qabsataan tigidhada iyo si aan u aragtaa waxyaabaha cusub ee soo kordha maalmaha iyo saacdaha, iyo macluumaadka ku saabsan shuruudaha maaskarada afka lagu daboolo iyo waliba tirada loo ogol yahay inay soo galaan madxafka.

Qeybaha farshaxanka ardayda waxaa sidoo kale laga helayaa inaad ku daawataan iyaga oo online ah. Sawir ka qaad [QR code](#) ka muuqata xaashida yar xogta sita (ama xagga hoose ee fariintani) sidii aad uga arki lahayd telefoonkaaga, ama waxaad si toos u tagtaa [bandhiga online](#) si aad uga daawato kumbuyuutarkaaga. Waxaad sidoo kale arki kartaa shaqooyin ay qabteen arday si gaar ah looga soo doortay shaqadii farshaxan ee ay qabteen in badan oo ka mid ah iskuulada PPS bandhig muuqaal gaar ah inta lagu jiro bisha Juun halkan [www.ppsartgallery.com](http://www.ppsartgallery.com).

**Bandhiga Xilliga Gu'ga:** Farshaxanada lagu soo bandhigo waxqabadka degmadu waxa ay ka mid noqon doonaan farshaxanada muuqaal ahaan ku soo biiri doona dhinaca online bandhiga maalinta Khamiista, Juun 10 laga bilaabo 7:00 p.m. Bandhiga Gu'ga waxa ay ardayda PPS ku soo bandhigi doonaan qoob-ka-ciyaar, muusik iyo bandhigyada masraxa, sidoo kale qeybo farshaxanka muuqaalka oo ku saabsan daris kasta oo ka mid ah darisyada dugsiyada degmada.

Munaasada waxaa sidoo kale laga daawan karaan bogga [PPS YouTube page](#) iyo bogga degmada [Facebook page](#). Bandhiga sidoo kale waxaad ka daawan kartaan mar dambe bogga [PPS YouTube page](#).

Waqtiyadii hore, labadani musaabadood waxa ay qeyb ka ahaan jireen hal munaasabad oo weyn taasi oo si toos ah loo baahiyo, bandhigani waxaa loo adeegsanayaa inuu noqdo furaha furitaanka HeART of Portland, iyada oo aan rajeyneyno inaan ku soo laabano sanadka soo socda habkeenii caadiga ahaa. Laakiin marka la eego isbedelada dhacay intii aan ku jirnay aafada xannuunka faafaya keenay, hal shay ayaa waxay noqotay joogto: tamarta faraha badan ee ardayd PPS ee dhinaca farshaxanka. Waxaan idinku dhiirigalineynaa inaad ka qeyb qaadataan mid ama labada munaasabadood sidii aad u arki lahaydeen run ahaanshaheeda.

Waxqabadka Farshaxanka & Muuqaalka PPS

